XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL
مكتب النائب العام

# WARBIXIN SANNADEEDKA 2022

# TUSMO

| | |
|---|---|
| FARRIINTA XEER ILAALIYAHA GUUD | 4 |
| TIRAKOOBKA DACWADAHA CIQAABTA XAFIISKA | 6 |
| SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA PUNTLAND | 11 |
| SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA KOONFUR GALBEED | 11 |
| SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA GAL-MUDUG | 12 |
| SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA HIR-SHABEELLE | 13 |
| SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA JUBALAND | 14 |
| CABASHOOYINKA SOO GAARAY XAFIISKA | 14 |
| HAGISTA IYO KORMEERKA BOOLISKA | 16 |
| KORMEERKA XARUMAHA DADKA LAGU XIRO | 20 |

| | |
|---|---|
| TABABARADA BOOLISKA | 25 |
| TAYAYNTA BAARIDDA FORANSIGGA | 25 |
| WACYI-GALIN BULSHO EE WAAXUHU QABTEEN | 28 |
| TABABARRADA SHAQALAHA | 29 |
| ADKAYNTA XIRIIRKA BAHWADAAGTA SHAQO | 30 |
| KORMEER MIDAYSAN: GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE IYO XIGQ | 31 |
| KORMEERKA WAAXAHA KALA DUWAN EE XAFIISKA | 32 |
| GUNAANAD | 32 |

# FARIINTA
# Xeer Ilaaliyaha Guud

**Marwooyin iyo Mudanayaal,**

***Waxaa sharaf weyn ii ah inaan idinla wadaago Warbixin Sannadeedka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka (XIGQ) ee sannadkii tagay ee 2022. Warbixinta sannadkan waxay ku soo aadaysaa sannadkii saddexaad oo si cilmiyaysan oo qaabaysan loo diyaariyo loona soo bandhigo guulaha la gaaray iyo higsiga.***



**Sulaymaan Maxamed Maxamuud**
Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka

XIGQ waxa uu udub dhexaad u yahay ilaalinta xuquuqda dastuuriga ah iyo sharciyeynta nidaamka cadaaladda danbiyeedka, isaga oo damaanad qaadaya in muwaadiniinta ay helaan cadaalad si hufan, daahfuran, oo la isku halayn karo. Mas'uuliyadeenna ugu weyn waa inaan hubinno in xeerarka iyo shuruucda dalka si cadaalad ah loo hirgeliyo, danaha qaranka la ilaaliyo, loona garab istaago kuwa nugul iyo kuwa aan codkooda la maqal.

> **Wuxuu baaraa, diyaariyaa oo oogaa dacwadaha ciqaabta ah. Wuxuu illaaliyaa danaha dawladda, hay'adaha, dadweynaha, iyo kuwa nugul ama naafada ah. Wuxuu dhawraa danta guud isagoo unkaya, ooga ama ka qaybgala dacwadaha madaniga ah marka ay lagama maarmaan noqoto. Dhidibada looma taagi karo nidaam cadaalad danbiyeed oo hufan, daahfuran, daacad ah, dhexdhexaadna ah haddii aan bulshada loogu adeegin si hufan lana hubsan dhawridda shuruucda dalka loona hoggaansamin.**

Sannadka 2023, waxaa naga go'an sii xoojinta iskaashiga XIGQ iyo xafiisyada xeer-ilaaliyeyaasha gobollada, adkaynta hufnaanta nidaamka cadaaladda, iyo hirgelinta qorshe dib-u-eegis lagu sameeyo istiraatiijiyadeenna mustaqbalka. Waxaa kale oo la horumarin doonaa nidaamka maamulka galalka iyo habka baarista cilmiga sayniska ku salaysan si loo xaqiijiyo cadaalad degdeg ah, la heli karo, oo dhexdhexaad ah.

Ugu dambayn, waxaan u mahadcelinayaa dhammaan shaqaalaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo dadaal badan geliyey horumarinta shaqada. Waxaan sidoo kale bogaadinayaa kooxdii ka qeyb qaadatay diyaarinta warbixintan qiimaha leh. Waxaan u rajeynayaa dhammaan bahda cadaaladda sannad horumar leh oo lagu guulaysto, iyada oo la ilaalinayo sharciga, cadaaladda, iyo mas'uuliyadda qaran.


Wa billahi Towfiiq.

# GOGOL-DHIG

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka Soomaaliya waxaa lagu aasaasay Xeerka Nidaamka Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Xeer Lr: 03, ee 12-ka Juun 1962. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu qayb ka yahay Hay'adda Garsoorka Soomaaliya.


# TIRAKOOBKA DACWADAHA CIQAABTA XAFIISKA 2022

Guud ahaan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa sannadka 2022 laga furay galal gaaraya **1678 gal.** Sida aad ka dheehan karto jaantuska kowaad **55.5%** oo u dhiganta **931** Gal ayaa dhammaaday halka **44.5%** oo u dhiganta **747** Gal ay socdaan. Dacwaduhu waxay ku dhammaan karaan inay maxkamadi xukun dhaqangala oo bari yeelid ah ama danbiilenimo ay ka soo saarto, in Xafiiska Xeer Ilaalintu si wafaqsan sharciga galka u xiro ama in Maxkamadduba sii dayso tuhunsanaha ka hor inta aan la eedayn




*Jaantuska 1aad Dacwadaha soo galay Xafiiska 2022*

Jaantuska 2aad waxaad ka dheehan kartaa galalka la furay bil kasta. Sida ka muuqata 3da bilood ee Ogosto, Sebtambar iyo Oktoobar waxay ka badan yihiin dacwadaha la furay sannadka intiisa kale oo idil. Sababtu waxa ay ku timid-sidaan ugu faahfaahin doono qaybta hagista iyo kormeerka ee warbixintan - hufidda hagista Booliska iyo joogtaynta kormeerka.




*Jaantuska 2aad Tirakoobka Dacwadaha Ciqaabta ah ee Xafiiska Jannaayo-Disambar*

Jaantuska 2aad waxaad ka dheehan kartaa galalka la furay bil kasta. Sida ka muuqata 3da bilood ee Ogosto, Sebtambar iyo Oktoobar waxay ka badan yihiin dacwadaha la furay sannadka intiisa kale oo idil. Sababtu waxa ay ku timid-sidaan ugu faahfaahin doono qaybta hagista iyo kormeerka ee warbixintan - hufidda hagista Booliska iyo joogtaynta kormeerka.

| Faah Faahinta Gungaarada | Jan | Feb | Mar | Abr | May | Jun | Jul | Aug | Sep | Oct | Nov | Dec |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Dacwadaha aan waligo'aanka laga gaarin | 17 | 21 | 27 | 31 | 26 | 39 | 43 | 64 | 71 | 81 | 71 | 19 |
| Kiisaska la xukumay | 46 | 39 | 41 | 43 | 37 | 28 | 19 | 21 | 18 | 19 | 6 | 0 |
| Dacwadaha Dembi lagu wayey/la sii daayey | 19 | 17 | 13 | 16 | 18 | 21 | 11 | 26 | 23 | 16 | 9 | 9 |
| Dacwadah muddo dhaafka lagusii daayay | 3 | 0 | 2 | 0 | 1 | 0 | 0 | 2 | 1 | 0 | 0 | 0 |
| Dacwadaha gal-xirida Xafiiska ku sameeyay | 36 | 19 | 21 | 27 | 24 | 23 | 18 | 24 | 21 | 15 | 7 | 3 |
| Gungaarada ku maqan Booliska iyo Rumaanka | 23 | 17 | 24 | 22 | 21 | 24 | 23 | 34 | 44 | 46 | 67 | 60 |
| **Wadar** | **144** | **113** | **129** | **139** | **127** | **135** | **114** | **171** | **178** | **177** | **160** | **91** |
| **Wadarta Guud** | | | | | | **1 , 6 7 8** | | | | | | |

*Jaantuska 3aad Faah Faahinta Gungaarada oo Bilaysan*


| Taarka | XaaladdaTaarka | Faalo |
|---|---|---|
| **222 Gal** | XIGQ ayaa Gal xiris ku sameeyay | Kaddib markii ay dacwadda kala laabteen dhibanayaashi ama laga heshiiyay |
| **226 Gal** | Darajada 1aad ayaa beri yeeshay | Maxkamadeyn kaddib dembi baa lagu waayay waana la siidaayay |
| **474 Gal** | Waala xukumay<br>Darajada 1aad | 353 xukun way dhaqangaleen<br>98 kamid ah waxa ay marayaan darajada 2aad<br>23 ka mid ah waxa ay marayaan darajada 3aad |
| **510 Gal** | Waxay marayaan Darajada 1aad | Dacwadeynta ayaa socota |
| **121 Gal** | Rugaha Booliska ayaa siidaayay | Qeybta Waliyoow Cadde (23)<br>Qeybta Galbeed (21)<br>Qeybta Bari (27)<br>Qeybta Bartamaha (22)<br>Hoggaanka Baarista Dembiyada CID (13)<br>Qeybta Nabadgalyada Wadooyinka (15) |
| **16 Gal** | Baaristooda ayaa socota | Garsugayaal (Roomaan) |
| **9 Gal** | Mudo dhaaf ayaalagu sii daayay | Baarista Ayaan lagu dhammayn wakhtigii loogu tala galay |

# Faah faahinta Noocayada Dembiyada ee Dacwadaha Xafiika XIG Sanadka 2022


| Faah faahinta Noocayada Dembiyada ee Dacwadaha Xafiika XIG Sanadka 2022 | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Nooca Dembiga** | **Galalka La Furay** | **Socda** | **Xafiisku Xiray** | **Go'aan Maxkamadeyn** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Beri** | **Dembiile** |
| 1 | Amaano lunsi | 73 | 35 | 6 | 32 | 17 | 15 |
| 2 | Tuugnimo | 151 | 76 | 11 | 64 | 23 | 41 |
| 3 | Shil dhaawac | 142 | 68 | 18 | 56 | 18 | 38 |
| 4 | Dhaawac | 211 | 79 | 36 | 96 | 33 | 63 |
| 5 | Dhac | 283 | 121 | 26 | 136 | 24 | 112 |
| 6 | Qiyaano/Turufo | 82 | 38 | 9 | 35 | 6 | 29 |
| 7 | Kufsi | 159 | 72 | 14 | 73 | 11 | 53 |
| 8 | Dagaal safayn ah | 22 | 7 | 4 | 11 | 6 | 5 |
| 9 | Dil | 133 | 77 | 18 | 38 | 15 | 23 |
| 10 | Shil dhimasho | 79 | 30 | 12 | 37 | 21 | 16 |
| 11 | Maandooriye | 82 | 42 | 8 | 32 | 4 | 28 |
| 12 | Been abuur dukumiinti | 21 | 9 | 6 | 6 | 4 | 2 |
| 13 | Burcad (Ciyaal-weero) | 79 | 37 | 13 | 29 | 7 | 22 |
| 14 | Tahriibin | 27 | 8 | 7 | 12 | 3 | 9 |
| 15 | Dhilaysi | 8 | 1 | 2 | 5 | 4 | 1 |
| 16 | Qoraalada foosha xun | 4 | 2 | 0 | 2 | 1 | 1 |
| 17 | Ku qasbid ka ganacsi jirka | 12 | 2 | 5 | 5 | 4 | 1 |
| 18 | Handadaad | 8 | 3 | 2 | 3 | 2 | 1 |
| 19 | Dayacaad ilmo yar | 3 | 1 | 0 | 2 | 2 | 0 |
| 20 | Ilmo iska soo ridid | 13 | 2 | 5 | 6 | 6 | 0 |
| 21 | Afduub | 8 | 2 | 2 | 4 | 2 | 2 |
| 22 | Kiisaska badda | 24 | 7 | 9 | 8 | 6 | 2 |
| 23 | Boob dhul | 19 | 13 | 4 | 2 | 1 | 1 |
| 24 | Amni darro | 24 | 9 | 3 | 12 | 4 | 8 |
| 25 | Bur burin hanti | 5 | 3 | 1 | 1 | 0 | 1 |
| 26 | Musuq maasuq | 4 | 2 | 1 | 1 | 1 | 0 |
| 27 | Fidinta wararka amniga lid ka ku ah | 2 | 1 | 0 | 1 | 1 | 0 |
| | **Wadarta** | **1678** | **747** | **222** | **709** | **226** | **474** |

*Jaantuska 5aad Faah faahinta Noocayada Dembiyada ee Dacwadaha Xafiika XIGQ Sanadka 2022*

Jaantuska 5aad wuxuu muujinayaa noocyada ay yihiin danbiyada Xafiisku galo iyo xaddiga uu la egyahay ama ay kala yihiin dacwadaha ay maxkamaduhu xukumeen oo ay bari yeeleen ama ay danbiilenimo ku xukumeen.




*Jaantuska 6aad : Shanta Fal Denbiyeed ee ugu badan Dacwadaha soo gaaray XIGQ 2022*




*Jaantuska 7aad Isbarbardhigga Dacwadaha 2020, 2021 iyo 2022*

Jaantuska kor ku xusan waxaad ka daalacan kartaa kororka galalka dacwadeed ee laga furay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka saddexdii sano ee ugu danbaysay oo si cilmiyaysan loo uruurinayay tirakoobka lana daabacayay. Sannadka 2021 wuxuu 44.4% ka badan yahay sannadkii ka horreeyay ee 2020.

Sannadkii la soo dhaafay ee 2022, marka la barbardhigo sannadkii ka horreeyay ee 2021 waxay dacwaduhu saree e ku kaceen 16%. Waxaa isbaddalka togan horseeday dadaalka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee tayaynta hagista Booliska, joogtaynta Kormeerka iyo tayaynta iyo hawlgalinta waaxyaha Xafiiska. Waxaa iyana koror la taaban karo ku yimid dacwadaha hirgalay ee ku dhamaaday xukun dhaqangalay oo danbiilenimo.kale ee sharcigu xusay.

# Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad- Goboleedka Puntland

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Puntland waxa uu diiwaangeliyay  sanadka 2022, dacwado tiradoodu tahay 2,518, waxaa dhammaaday 2,453, waxaa weli socda 65.

| Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad-Goboleedka Puntland | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Nooca Dembiga** | **Galalka Lafuray** | **Socda** | **Xafiisku Xiray** | **Go'aan Maxkamadeyn** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Beri** | **Dembiile** |
| 1 | Dil | 116 | 7 | 1 | 108 | 4 | 104 |
| 2 | Kufsi | 123 | 4 | 5 | 114 | 6 | 108 |
| 3 | isku day kufsi | 14 | 1 | 3 | 10 | 4 | 6 |
| 4 | Tuugo | 491 | 7 | 10 | 474 | 15 | 459 |
| 5 | Daroogo | 406 | 10 | 6 | 390 | 10 | 380 |
| 6 | Dagaal safayn | 67 | 7 | 2 | 58 | 8 | 50 |
| 7 | Khiyaamo | 69 | 5 | 3 | 61 | 5 | 56 |
| 8 | Dhac | 216 | 6 | 10 | 200 | 10 | 190 |
| 9 | Tahriib | 21 | 0 | 1 | 20 | 0 | 20 |
| 10 | Isku day dil | 15 | 0 | 2 | 13 | 3 | 10 |
| 11 | Dhaqan celin | 190 | 0 | 0 | 190 | 0 | 190 |
| 12 | Dhaawac | 452 | 8 | 2 | 442 | 5 | 437 |
| 13 | Dhul | 26 | 1 | 2 | 23 | 0 | 23 |
| 14 | Lunsasho hanti qaran | 20 | 1 | 4 | 15 | 5 | 10 |
| 15 | Burcad | 54 | 2 | 0 | 52 | 2 | 50 |
| 16 | Tacadi Dumar | 44 | 2 | 2 | 40 | 5 | 35 |
| 17 | Khasaare hanti | 74 | 4 | 3 | 67 | 7 | 60 |
| 18 | Nabad galyo xumo | 89 | 0 | 9 | 80 | 10 | 70 |
| 19 | Tacadi Caruur | 10 | 0 | 0 | 10 | 0 | 10 |
| 20 | Afduub | 1 | 0 | 0 | 1 | 0 | 1 |
| 21 | labo guursi | 3 | 0 | 0 | 3 | 0 | 3 |
| 22 | Hanjabaad | 17 | 0 | 3 | 14 | 4 | 10 |
| | **Wadar** | **2,518** | **65** | **68** | **2385** | **103** | **2,282** |

*Jaantuska 8aad Faah faahinta Dacwadaha Xafiika Xeer Ilaaliyaha Guud ee Puntland*

# Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Dowlad- Goboleedka Koonfur Galbeed

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Koonfur Galbeed waxa uu diiwaangeliyay sanadka 2022, dacwado tiradoodu tahay 744, waxaa dhammaaday 634, waxaa weli socda 110.

| Gobolka Baay | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Nooca Dembiga** | **Galalka Lafuray** | **Socda** | **Xafiisku Xiray** | **Go'aan Maxkamadeyn** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Beri** | **Dembiile** |
| 1 | Dil | 33 | 9 | 0 | 16 | 0 | 8 |
| 2 | Kufsi | 36 | 3 | 7 | 9 | 8 | 9 |
| 3 | Dhaawac | 60 | 14 | 12 | 22 | 0 | 12 |
| 4 | Tuugo | 44 | 0 | 18 | 11 | 8 | 7 |
| 5 | Afduub | 21 | 0 | 12 | 4 | 0 | 5 |
| 6 | Dhulboob | 57 | 20 | 12 | 0 | 0 | 25 |
| 7 | Caasinimo | 18 | 0 | 0 | 6 | 6 | 6 |
| 8 | Been Abuur | 42 | 0 | 20 | 7 | 0 | 15 |
| 9 | Amaano Lunsi | 37 | 5 | 13 | 12 | 1 | 6 |
| 10 | Khamri | 27 | 3 | 19 | 0 | 0 | 5 |
| **Wadarta Guud** | | **375** | **54** | **113** | **87** | **23** | **98** |
| **Gobolka Bakool** | | | | | | | |
| 1 | Dil | 31 | 5 | 5 | 5 | 7 | 9 |
| 2 | Kufsi | 30 | 4 | 0 | 6 | 4 | 16 |
| 3 | Dhaawac | 31 | 3 | 5 | 5 | 6 | 12 |
| 4 | Tuugo | 19 | 0 | 6 | 4 | 0 | 9 |
| 5 | Afduub | 27 | 4 | 4 | 5 | 0 | 14 |
| 6 | Khamri | 22 | 0 | 7 | 0 | 7 | 8 |
| 7 | Dhulboob | 9 | 3 | 0 | 0 | 0 | 6 |
| **<!-- Generator: Adobe Illustrator 24.0.1, SVG Export Plug-In -->** | | **169** | **19** | **27** | **25** | **24** | **74** |
| **<svg version="1.1" xmlns="http://www.w3.org/2000/svg" xmlns:xlink="http://www.w3.org/1999/xlink" x="0px" y="0px"** | | | | | | | |
| | | 35 | 7 | 8 | 6 | 7 | 7 |
| | | 24 | 9 | 0 | 3 | | 4 |
| <style | Dhaawac | 34 | 5 | 6 | 6 | 5 | 12 |
| | .st0{fill:none;} | 30 | 6 | 6 | 8 | | 3 |
| | .st1{fill- | 34 | 3 | 5 | 9 | 3 | 14 |
| | .st2{fill:#2E368F;} | 27 | 3 | 6 | 6 | | 3 |
| | .st3{fill:#FFFFFF;} | 16 | 4 | 0 | 3 | 4 | 5 |

Jaantuska 9aad Faah faahinta Dacwadaha Xafiika Xeer Ilaaliyaha Guud ee Koonfur Galbeed

# SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA GAL-MUDUG

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Galmudug waxa uu diiwaangeliyay sanadka 2022, dacwado tiradoodu tahay 467, waxaa dhammaaday 397, waxaa weli socda 70.

| Gobolka Galgaduud | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Nooca Dembiga** | **Galalka Lafuray** | **Socda** | **Xafiisku Xiray** | **Go'aan Maxkamadeyn** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Beri** | **Dembiile** |
| 1 | Dil | 27 | 7 | 0 | 11 | 0 | 9 |
| 2 | Kufsi | 24 | 3 | 4 | 6 | 5 | 6 |
| 3 | Dhaawac | 73 | 13 | 20 | 23 | 0 | 17 |
| 4 | Tuugo | 42 | 0 | 18 | 9 | 8 | 7 |
| 5 | Afduub | 20 | 0 | 12 | 3 | 0 | 5 |
| 6 | Dhul boob | 52 | 23 | 11 | 0 | 0 | 18 |
| 7 | Caasinimo | 10 | 0 | 0 | 7 | | 3 |
| 8 | Been Abuur | 42 | 0 | 18 | 9 | 0 | 15 |
| 9 | Amaano Lunsi | 35 | 7 | 13 | 10 | 1 | 4 |
| 10 | Khamri | 20 | 3 | 12 | 0 | 0 | 5 |
| **Wadarta Guud** | | **345** | **56** | **108** | **78** | **14** | **89** |
| **Gobolka Mudug** | | | | | | | |
| 1 | Dil | 21 | 3 | 4 | 3 | 3 | 8 |
| 2 | Kufsi | 17 | 3 | 0 | 2 | 2 | 10 |
| 3 | Dhaawac | 29 | 3 | 4 | 6 | 5 | 11 |
| 4 | Tuugo | 15 | 0 | 2 | 5 | 0 | 8 |
| 5 | Afduub | 22 | 3 | 3 | 5 | 0 | 11 |
| 6 | Khamri | 12 | 0 | 2 | 0 | 3 | 7 |
| 7 | Dhul boob | 6 | 2 | 0 | 0 | 0 | 4 |
| **Wadarta Guud** | | **122** | **14** | **15** | **21** | **13** | **59** |

*Jaantuska 10aad Faah faahinta Dacwadaha Xafiika Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gal-Mudug*

## SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA HIR-SHABEELLE

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Hirshabeelle waxa uu diiwaangeliyay sanadka 2022, dacwado tiradoodu tahay 293, waxaa dhammaaday 248, waxaa weli socda 45.

| Gobolka Shabeellada Dhexe | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Lmr** | **Nooca Dembiga** | **Galalka Lafuray** | **Socda** | **Xafiisku Xiray** | **Go'aan Maxkamadeyn** | **Xukun** | |
| | | | | | | **Beri** | **Dembiile** |
| 1 | Dil kas ah | 20 | 7 | 9 | 4 | 4 | |
| 2 | Tuugonimo | 60 | 2 | 45 | 13 | 7 | 6 |
| 3 | Kufsi | 25 | 10 | 5 | 10 | 2 | 8 |
| 4 | Dhaawac culus | 17 | 6 | 6 | 5 | 4 | 1 |
| 5 | Dhul boob | 7 | 3 | | 4 | 2 | 2 |
| 6 | Burcadnimo | 21 | 0 | 15 | 6 | 2 | 4 |
| 7 | Maandoriye | 20 | 6 | 10 | 4 | 1 | 3 |
| 8 | Amardiido maamul | 18 | 1 | | 17 | 0 | 17 |
| 9 | Turuufo | 17 | | 7 | 10 | 2 | 8 |
| **Wadarta Guud** | | **205** | **35** | **97** | **73** | **24** | **49** |
| **Gobolka Hiiraan** | | | | | | | |
| 1 | Dil kas ah | 13 | 5 | 8 | | | |
| 2 | Tuuganimo | 21 | 1 | 20 | | | |
| 3 | Kufsi | 18 | 2 | 10 | 6 | 6 | |
| 4 | Dhaawac | 28 | 2 | 21 | 5 | 5 | |
| 5 | Dhul boob | 8 | | 7 | 1 | 1 | |
| **Wadarta Guud** | | **88** | **10** | **66** | 12 | **12** | |

Jaantuska 11aad Faah faahinta Dacwadaha Xafiika Xeer Ilaaliyaha Guud ee Hir-Shabeele

## SHAXDA DACWADAHA XAFIISKA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE DOWLAD- GOBOLEEDKA JUBALAND

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Jubaland  waxa uu diiwaangeliyay  sanadka 2022, dacwado tiradoodu tahay 414, waxaa dhammaaday 349 , waxaa weli socda 65.

| Lmr | Nooca Dembiga | Galalka Lafuray | Socda | La oowday | Eed ka noqosho | Xukun | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | Beri | Dembiile |
| 1 | Tuuganimo | 170 | 19 | 49 | 34 | 1 | 67 |
| 2 | Jaraaxo | 80 | 12 | 17 | 23 | 2 | 26 |
| 3 | Anshax Xumo | 32 | 4 | 7 | 12 | 0 | 9 |
| 4 | Maandooriye | 37 | 11 | 5 | 1 | 0 | 20 |
| 5 | Burburin hanti | 14 | 2 | 8 | 2 | 0 | 2 |
| 6 | Khayaano | 20 | 4 | 6 | 4 | 0 | 6 |
| 7 | Afduub | 4 | 0 | 0 | 1 | 0 | 3 |
| 8 | Kufsi | 21 | 4 | 0 | 0 | 0 | 17 |
| 9 | Dil | 23 | 9 | 4 | 2 | 0 | 8 |
| 10 | Aflagaado | 7 | 0 | 1 | 5 | 0 | 1 |
| 11 | Ku Xadgudub Hooy | 3 | 0 | 0 | 0 | 1 | 2 |
| 12 | Xirasho Dhar Ciidan | 1 | 0 | 0 | 0 | 1 | 0 |
| 13 | Tahriibin | 2 | 0 | 0 | 0 | 0 | 2 |
| **WADARTA** | | **414** | **65** | **97** | **84** | **5** | **163** |

*Jaantuska 12aad Faah faahinta Dacwadaha Xafiika Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland*

# CABASHOOYINKA SOO GAARAY XAFIISKA

Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka sannadka 2022 waxaa soo gaaray 495 cabasho. 283 ka mid ah oo u dhiganta 57% waxaa laga gaaray go'aan, halka ay wali socdaan 139 oo u dhiganta -28%. 47 ka mid ah cabashooyinkaa waxay noqdeen cabasho madani ah oo markaa cabtaha lagula taliyay inuu u gudbiyo maxkamadda ay khusayso.




*Jaantuska 13aad: Tirada Guud ee Cabashooyinka XXGQ*

## CARUURTA LA-TUURO

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa mas'uuliyaddiisa ka mid ah ilaalinta xuquuqda dadka nugul ama baahiyaha gaarka ah qaba iyo caruurta bannaanada lagaga tago ama isbitaalada lagaga dhuunto. Sannadka 2022 waxaa la diiwaangeliyay 37 carruur ah oo isugu jira kuwa bannaanada lagu soo tuuray iyo kuwo isbitaallada lagu dhalay loogana dhuuntay. Ubadkaas Xafiisku wuxuu xil iska saaray gacan-ku-hayntooda iyo barbaarintooda isagoo u xil saaray dad la xaqiijiayay ku haboonaantooda, laguna aamini karo mas'uuliyadda loo xilsaaray.



*Jaantuska 14aad: Caruurta Banaanka lagu soo tuuray ama isbitaalada lagaga tagay*

## OGGOLAANSHAHA AASIDDA MAYDADKA

Saldhigyada Booliska ee Degmooyinka Gobolka Benaadir waxay Xafiiska la soo wadaageen lana diiwaangaliyay 17 Mayd oo qaarkood baddu soo tuftay, ama ku maashooday ama bannaanada laga soo qaaday oo aan la aqoonsan cidda dishay. Xafiisku wuxuu qaatay kaalintiisa sharci ee uu leeyahay isagoo ogolaaday fududeeyayna aasiddooda. Waxaa iyana la fududeeyay dhoofinta 5 mayd oo ajnabi ah oo dalka siyaabo kala duwan ugu geeriyooday.



*Jaantuska 15aad Maydadka aasidda loo ogolaaday ama la fududeeyay*



# GAARSIIN DIBADEEDKA MAXKAMADAHA

Xafiiska asagoo gudanaya waajibaadkiisa ku qeexan Qodobka 100aad ee Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed, ayaa wuxuu maxkamadaha waddamada caalamka gaarsiiyay u yeerid dad tiradoodu gaarayso 34 Ruux oo ku kala sugan waddamo kala geddisan sida Maraykanka, Boqortooyada Biritan, Faransiiska, Turkey, Yemen, iyo Kenya.

# HIIGSIGA & KORMEERKA

Xafiiska Xeer Ilaalliyaha Guud ee Qaranka  oo ka duulaya waajibaadkiisa sharci ee la xiriira hagista baarista  iyo ka hortagga danbiyada iyo waliba halkudhaggii shir-sanadeedkii Xeer Ilaaliyahaha Guud ee Qaranka iyo Xeer ilaaliyayaasha Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka ee sannadka 2021 ciwaankiisuna ahaa haggis hufan, ayaa wuxuu xoogga saaray sidii loo taabbagalin lahaa hagis hufan loona joogtayn lahaa kormeerka. Haddaba, sannadlkii dhammaaday, waxaa la qaaday talaabooyin lagu hirgalinayo hawlahaa.

Waxaa faham buuxda laga qaatay waajibaadka Xafiiska ee ku aaddan hagista. Waxaana la asaasay waaxyo iyo Xafiisyo lagu hago hawlaha baaridda iyo ka-hortagga danbiyada ee Booliska. Waxaa Xafiis hagis laga furay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyo waliba Hoggaanka Baarista Danbiyada (CID). Labadaa Xafiisba waxaa maalin walba ka hawlgala xeer ilaaliyayaal ku haga Booliska gaar ahaan baarayaasha hawlaha la xiriira helis baaris hufan. Waxaa la diyaariyay foomam lagu dabagalo hawlahaa. Foomkaas wuxuu ku lifaaqan yahay warbixinta.




Xafiiska Haggidda Hawlaha Booliska

## UJEEDDADA LOO AASAASAY XAFIISKA HAGISTA

Ujeedada ugu weyn ee keentay in la furo Xafiiska Hagista waa in la:

1. saxo lana hufo tayada horgeynta dacwadaha maxkamadaha iyo in Xafiisku la socdo dacwadaha maxkamad la horgaynayo;
2. siiyo baarayaasha awaamiirta ku habboon ee la xiriira dhammaystirka baarista dacwadaha;
3. dardargaliyo shaqada lana tayeeyo baaridda gal-dacwadeedyada ciqaabta ah;
4. laga ilaaliyo dacwadda mudda-dhaaf;
5. ilaaliyo caddaymaha hordhaca ah lana xaqiijiyo sharci-ahaanshaha caddaymaha;
6. tayeeyo aqoonta baarayaasha Booliska si loo helo cadaalad hufan; iyo
7. joogteeyo la-xisaabtanka Booliska si loo hor mariyo shaqada bulshada loo hayo. saxo lana hufo tayada horgeynta dacwadaha maxkamadaha iyo in Xafiisku la socdo dacwadaha maxkamad la horgaynayo.

## DIYAARINTA DUKUMIINTIYADA XAFIISKA IYO DHAQANGALKA

Xafiiska Hagista Booliska waxaa loo sameeyay foom u gaar ah oo ay ku qoran yihiin su'aalaha hagista; sida: magaca baaraha kiiska hagista loo sameeynayo, taariikhda la keenay kiiska iyo macluumaadka lagama maarmaanka u ah hagista si loo ilaaliyo mudada sharciga ah, caddaymaha loo sugo, baaristana loo hufo. Foomkaasina wuxuu ku lifaaqan yahay warbixinta.

Waxaa kale oo la sameeyay gal lagu kaydiyo dhammaan xogta galka la hagay waxaana la soo saaray amar lagu dhaqangalinayo oo nuxurkiisu yahay in aan laga qaban sarkaalka Booliska ah gungaar aanu ku jirin dukumiintiga xafiiska hagista booliska, tusaaalaha baarista iyo shuruudaha kale ee sharcigu xusay.

Xafiisyadan waxaa kale oo loo sameeyay waajibaad cad oo ay xilkooda ku gutaan. Waajibaadka iyo xilka waaxahan iyaguna waxay ku lifaaqan yihiin warbixintan.

Waxaa kaloo wax laga baddalay nidaamka galfuridda dacwadaha iyo goorta lagu qorayo xeer ilaaliye galka dacwadda ciqaabta ah. Halkii ay awal ahayd in xeer ilaaliye gal lagu qoro marka uu Xafiiska soo gaaro gungaarka, waxaa hadda galka xeer ilaaliye lagu qoraa marka uu Xafiiska soo gaaro warbixin-danbiyeedka si loo adkeeyo hagista, galka looga ilaaliyo mudda-dhaaf, loona hubiyo tayada baarista. Arrintan waxay gaar ahaan aad u yareysay ama ay meesha ka saartay inuu gal muddo-dhaafo ama dacwadu burburto ka hor inta aan laba maxkamadayn.

## GUULAHA LA GAARAY

1. Waxaa lagu guulaystay in la fahan siiyo Booliska waajiboodkooda ku aaddan ilaalinta mudada sharciga, ilaalinta caddeymaha iyo tayaynta baarista.
2. Waxaa lagu guulaystay in muddo dhaafka aad loo yareeyo.
3. Waxaa lagu guulaystay in kor loo qaado xirfadda shaqo ee baareyaasha.
4. Waxaa lagu guulaystay in la yareeyo cabashooyinka bulshada ee la xiriira Booliska ee in dad la xiro ama la sii daayo iyaddoo aanu Xafiisku ka warhayn.
5. Waxaa lagu guulaystay in la dhaqan galiyo tusaalaha baarista.
6. Waxaa la adkeeyay xiriirka wadashaqaynta Booliska iyo XIGQ.

## KORMEERKA XARUMAHA DADKA LAGU XIRO


Kormeerku wuxuu lagama maarmaan u yahay helista hagis hufan. Haddaba, XIGQ isagoo gudanaya waajibaadkiisa kormeer ee xarumaha Booliska iyo goobaha kale ee dadka lagu xiro ayaa waxaa dib loo habeeyay Waaxda Kormeerka iyo Dabagalka Booliska. Waxaa la joogteeyay kormeerka Saldhigyada Boliiska Degmooyinka Gobolka Banaadir iyo xabsiyada kale.

## UJEEDADA KORMEERKA

Kormeerka waxaa looga gol leeyahay inay saraakiisha Saldhigyada Boliiska Gobolka Banaadir iyo Xabsiyada kalaba u noqoto dhiirigalin iyo in uu jiro isla-xibaatan si ay u wanaagsanaato shaqada ay u hayaan bulshada ku nool Gobolka Banaadir iyo Degaanada ku dhaw. Gaar ahaan waxaa la hubiyay in la tuhunsane kasta oo xiran muddo 24 saac gudaheed ah lagu keeno warbixin-danbiyeedka la xiriira falkiisa, la hubiyo sida loola dhaqmo iyo dhawrista xuquuqda la-tuhunsanayaasha, tirakoobka iyo ka warhaynta dadka la xiro ama la sii daayo, la ilaaliyo mudda-dhaafka loona tayeeyo baaridda laguna soo dhammeeyo iyadoo aanu galka galin dib-u-dhac aan maangal ahayn

## NATIIJADA KORMEERKA


Waxaa xiriir toos ah uu ka dhaxeeyaa joogtaynta kormeerka iyo sare-u-kaca warbixin-danbiyeedyada ka yimaadda xarumaha Baarista. Sida aan ku arki doono jaantuska caddeynaya xiriirkaa waxaa sare-u-kacay warbixin-danbiyeedyada ka imanayay Saldhigyada Boliiska, Hoggaanka Nabadgalyada Waddooyinka, Hoggaanka Baarista Dembiyada iyo Laanta Ilaalada Canshuuraha. Waxaa kaloo yaraaday in gungaarada lala soo daaho ama aan shuruudihiisa la soo dhammaystirin. Waxaa kormeerka kaddib xoogaystay wadashaqaynta Xafiiska iyo Booliska iyo dhiirrigalinta saraakiisha Booliska. Arrintani waxay muujinaysaa xiriirka tooska ah ee ka dhaxeeyaa kormeerka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu ku sameeyo Xarumaha Boliiska iyo Xabsiyada iyo dardargalinta hawlaha Booliska. Sidaa darteed waa lagama maarmaan in la joogteeyo.




*Jaantuska 16aad: Xiriirka Kormeerka iyo Tirada Galalka 2022*

**ISBARBARDHIGA KORMEERKA SANADAHA 2020, 2021 & 2022**

Markii is bar bardhig iyo qiimeyn lagu sameeyay kormeerka saddaxdii sano ee u dambaysay waxaa aad dareemaysaa in ay aad u sare kacday kiisaska soo gaaraya xafiiska markasta oo uu xafiisku sii badiyo kormeerka waxaa sii kordhaya kiisaska soo gaaraya xafiiska.




*Jaantuska 17aad: Isbarbardhiga Kormeerka 2020, 2021 iyo 2022*

## KORMEERKA XABSIYADA IYO SALDHIGYADA BOOLISKA

Waxaa wareegto dib loogu magacaabay Waaxda Kormeerka Xabsiyada, Saldhigyada iyo Hagista Baarista Booliska, ee XIGQ. Waxaa loo magacaabay xeer ilaaliyaal fuliya hawshaas. Waaxda wuxuu Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku u xilsaaray howlaha kormeerka maxaabiista, Xabsiyada, Saldhigyada iyo Hagista Baarista Booliska.

Waxayna shaqadoodu tahay kormeer iyo qiimeeyn joogta ah oo ay ku sameeyaan saldhigyada maxabiista ku xiran, u kuur galidda shaqada ay Boolisku u hayaan bulshada, habdhaqankooda iyo xaqiijinta xuquuqda maxaabiista ku xiran saldhigyada iyo xabsiyada.

## GOOBAHA LA KORMEERAY

Waaxdu ayadoo gudanaysa waajibaadkaa loo igmaday ayaa waxay kormeer ku tageen dhammaan 17ka Saldhig Boolis ee Gobolka Banaadir, Hoggaanka Nabadgelyada Waddooyinka, Hoggaanka Baarista Danbiyada iyo Laanta Ilaalada Canshuuraha.

Waaxdu waxay intii u dhaxaysay 19/07/2022 iilaa 06/10/2022 kormeertay ugu yaraan hal mar dhammaan Qaybaha iyo Saldhigyada Boolis ee Gobolka Banaadir, Hoggaanka Nabadgalyada Waddooyinka, Saldhigyada Dakadda Muqdisho iyo Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Aadan Cabdulle iyo Xaruunta Taliska Guud ee Laanta Ilaalada Canshuuraha. Kormeeradaasi waxay isugu jireen kuwa qorshaysan iyo kuwa dagdag ah oo ku yimid cabasho ama dhalliil Xafiisku helay.

Waxaa goobaha qaarkood laga soo sheegay dacwado si khalad ah loo maareeyay iyo maxaabiis mudda dheer xirnaa iyadoo aanan la horkeenin Maxkamad.

Waxaa ka dhashay khaladaadka la arkay in shaqada laga joojiyo baarayasha qaar, iyo in sidoo kale in loo yeero taliyayaasha xarumahaa su'aalana laga weydiiyo arrimaha laga soo sheegay xarunta.

Waaxda Kormeerku waxay diyaarsatay foomam lagu hago, laguna helo warbixinta dhabta ah ee goobta ay kormeereen. Foomamkaasi way ku lifaaqan yihiin warbixinta. Waaxdu waxay warbixin dhammaystiran u soo gudbisaa XIGQ kaddib kormeerka goob walba.



*Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Qaranka iyo madaxda Garsoorka oo booqanaya Xabsiga MPCC*



*Gudigga Kormeerka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo booqanaya xabsiga dhexe*

## KHALADAADKA SHARCI

Waxaa jira Kkhaladaad sharci oo ka jira saldhigyada Booliska degmooyinka iyo goobaha kale ee la kormeeray waxaana ka mid ah:

1. In dhammaan goobaha la booqday aanay ilaalinin waajibaadkooda soo dirista waxbinta koowaad iyo labaad ee danbiyada. Kormeerka kaddib waxaa jira isbaddal kooban.
2. In saldhigyada qaar aanay dhawrin ikhtisaaska maxkamadaha.
3. Saldhigaydda qaar waxaan ku aragnay maxaabiis mudo-dhaaf ah.
4. Waaxdu waxay talooyin ka bixisay raacidda iyo ilaalinta xeerarka iyo dhammaan shuruudaha uu sharcigu jidaynayo.

## KHALADAADKA MAAMUL

1. Dhammaan goobaha waaxdu kormeertay waxay ka siman yihiin in Xafiisyadda danbi-baarayaasha ay aad u baaba'san yihiin, aadna ay uga hooseeyaan kan tusaale ahaan taliyaha, taasoo muujinaysa in uusan micno badan siinayn taliyaha saldhigga ama goobtaa maamula.
2. Isku milanka baaraha iyo taliyaha saldhiga ayaa ah khalad maamul waxayna meesha ka saari kartaa isla-xisaabtanka iyo isa sixidda.
3. Ilaalin la'aanta silsiladda kala saraynta iyo nidaamka diiwaangalinta dacwadaha. Qaar ka mid ah saldhigyada aan waxaa isku xiran oobistaha iyo taliyaha saldhigga, iyadoo laga boodo danbi-baaraha.

## XUQUUQDA MAXAABISTA

Maxaabiista ku xiran goobaha la kormeeray waxaa kajira cabashooyin badan oo ay maxaabiistu ka cabanayaan. Arrimaha ugu badan ee cabashadu ka taagantahay waxaa ugu wayn kuwan soo socda:

1. **Cunnada:** Maadaama Xabsiga Dhexe buuxsamay sida ay ku sheegeen Saraakiisha Asluubtu, waxaa maxaabiista si ku-meel-gaar ah loogu sii xiraa Saldhigyada kuwaas oo aan laheyn cunno loo qoondeeyay ama garaam loogu talagalay maxaabiista. Saraakiisha Saldhigyada Boolisku waxa ay sheegeen in maxaabiistu ay askarta cunnada la cunto lana wadaago garaamka loogu talagalay askarta ku jirta shaqada. Arrintaas waxa ay saameeyn ku yeelatay saldhigga iyo maxaabiista labadaba, waana arrin muuqata oo aan qarsooneeyn.
2. **Dayactirka:** intooda badan saldhigyada iyo goobaha lagu xiro maxaabiista waxaa ka muuqda burbur baahsan oo u baahan in lagu sameeyo dayactir dagdag ah. Dhammaan saldhigyadu malahan musqulo u qalma in qof bani'aadam ah isticmaalo xagga nadaafadda, muuqaalka iyo dayaca ka muuqda intaba. Sidaas oo kale Xabsiyada lagu xiro maxaabiista intooda badan malahan daaqado ay hawa ka qaataan Maxaabiistu, waqtiyada kuleeylaha waxa ay saameeyn kartaa nolosha maxaabiista ku xiran xabsiga haddii aysan helin meel ay ka qaataan hawada iyo ileeyska.
3. **Nadaafadda:** Saldhigyada qaarkood waxa ka jirta nadaafad darro aad u baahsan, taasoo Waaxdu awaamir ka bixisay, kulana xisaabtantay masuuliyiinta saldhigyada iyo goobaha kale. Kormeeradii danbe waxaa laga dareemayay isbaddal la xiriira dhinnaca nadaafadda iyo fayadhowrka.
4. **Caafimaadka:** inta badan maxaabiista ku xirnaa goobaha la kormeeray kama muuqan wax caafimaad darri ah oo ka dhashay ama ku yimid inta ay ku xirnaayeen goobtaa. Hasayeeshee maxaabiista qaar waxa ay sheeganayaan kor-cun-cun iyo xanuuno ay keeni karaan nadaafadda goobaha ee hooseysa.
5. **Hoyga:** dhammaan goobaha dadka lagu xiro waxa ay ka siman yihiin in aysan maxaabiistu helin gogol ku habboon in ay ku jiiftaan, halka qaarkood ay salliyo ama furaashyo aad u duugoobay leeyihiin.

## CAQABADAHA HAYSTA GOOBAHA

Waaxda oo diiradda saaraysa sare-u-qaadidda tayada shaqada bulshada iyo adeegga loo hayo ayaa kulamo iyo wareeysiyo kala duuwan la yeeshay saraakiisha hoggaamisa goobahaa si loo ogaado caqabadaha ka haysta shaqada iyo agabka aasaaska u ah qabsoomidda shaqooyinka aasaasiga ah. Dhammaan saraakiisha Saldhigyada waxa ay qabeen cabasho isku mid ah oo la xiriirta hannaanka shaqo iyo wada shaqeynta kala dhaxeeysa hay'adaha garsoorka dalka.

## CAQABADAHA LA XUSAY

1. **Gaadiidka Saldhigyada oo aad u yar ama aysan lahaynba:** inta badan saldhigyada waxa ay adeegsadaan Hal (1) gaari oo inta badan ah kan taliyaha, kaasoo ay u adeegsadaan dhammaan arrimaha laxiriira ammaanka, isu socodka, daabulka maxaabiista iyo agabka lagu soo qabto goobaha howlgallada. Tusaale: Degmo dhan oo marka ay ugu yaraato habeenkii la soo xiro 20 ama 30 danbiile, oo mid kasta laga doonayo in ay 48 saac maxkamad lagu horgeeyo ayaa haysata 1 (hal) gaari amaba aanan haysan gaadiid. Mararka qaar waxa ay maxaabiista ku soo qaadaan Bajaajyo taasoo keeni karta in Baaraha noloshiisa ama ammaankiisa halis-gasho ama maxbuus ka fakado cadaaladda.

2. **Agab xafiiseedka shaqada oo aad u kooban:** agabka ay isticmaalaan Baarayaasha, iyo kuwa danbiyada lagu baaro oo aad u kooban kana hooseeya heerkii la rabay. Baarayaasha qaar ma laha Kumbiyuutarro ay ku qoraan xogta iyo warbixinada shaqada, qalabki wax lagu daabacayay iyo agabka baarista la xiriirana maba jiro. Waxaa jira baare aanan heeysan Kaamiro ama agabki muhiimka u ahaa goobta dambigu ka dhaco.

3. **Xirfadda Baarayaasha oo hoosaysa:** Xirfadda taliyayaasha, baarayaasha, oobiistayaasha ee la xariirta sharciga iyo xeerarka dalka ayaa u bahaan in sare loo qaado. Tababar fiican ma helaan. Intooda badan waxay leeyihiin kaliya khibrad la xiriirta shaqadooda. Arrintaasi, waxa ay saameeyn adag ku yeelatay arrimaha la xiriira xuquuqda maxaabiista, horgeynta maxkamadaha, gungaarada iyo baarista danbiyada.




*Xafiiska Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo Kormeer ku tagey Saldhigyada Booliska ee degmooyinka Cabdicasiis iyo Warta Nabada*

## TALO SOO JEEDIN

1. Gaadiidka Saldhigyada oo aad u yar ama aysan lahaynba: inta badan saldhigyada waxa ay adeegsadaan Hal (1) gaari oo inta badan ah kan taliyaha, kaasoo ay u adeegsadaan dhammaan arrimaha laxiriira ammaanka, isu socodka, daabulka maxaabiista iyo agabka lagu soo qabto goobaha howlgallada. Tusaale: Degmo dhan oo marka ay ugu yaraato habeenkii la soo xiro 20 ama 30 danbiile, oo mid kasta laga doonayo in ay 48 saac maxkamad lagu horgeeyo ayaa haysata 1 (hal) gaari amaba aanan haysan gaadiid. Mararka qaar waxa ay maxaabiista ku soo qaadaan Bajaajyo taasoo keeni karta in Baaraha noloshiisa ama ammaankiisa halis-gasho ama maxbuus ka fakado cadaaladda.

2. Agab xafiiseedka shaqada oo aad u kooban: agabka ay isticmaalaan Baarayaasha, iyo kuwa danbiyada lagu baaro oo aad u kooban kana hooseeya heerkii la rabay. Baarayaasha qaar ma laha Kumbiyuutarro ay ku qoraan xogta iyo warbixinada shaqada, qalabki wax lagu daabacayay iyo agabka baarista la xiriirana maba jiro. Waxaa jira baare aanan heeysan Kaamiro ama agabki muhiimka u ahaa goobta dambigu ka dhaco.

3. Xirfadda Baarayaasha oo hoosaysa: Xirfadda taliyayaasha, baarayaasha, oobiistayaasha ee la xariirta sharciga iyo xeerarka dalka ayaa u bahaan in sare loo qaado. Tababar fiican ma helaan. Intooda badan waxay leeyihiin kaliya khibrad la xiriirta shaqadooda. Arrintaasi, waxa ay saameeyn adag ku yeelatay arrimaha la xiriira xuquuqda maxaabiista, horgeynta maxkamadaha, gungaarada iyo baarista danbiyada.

## QIIMEEYNTA SALDHIGYADA

Qiimeeynta hoos ku xusan ee lagu sameeyay Saldhigyada iyo adeegga ay bulshada u hayaan waxaana lagu saleeyay shuruudahan soo socda:

1. Adeeg bixinta (la shaqeynta shacabka, fudeeynta adeegga, Howlgallada, agabka iyo adeeg bixinta);

2. Xaquuqda maxbuuska (nadaafadda, badqabka, caafimaadka, cunnada);

3. Ilaalinta sharciga;

4. Xirfadda Saraakiisha ee arrimaha sharciga (oobistaha, soo diridda warbixin-danbiyeedka, tayada baarista, horgeynta, iyo shuruudaha gungaarka); iyo

5. Wadashaqeynta ka dhaxeysa XIGQ iyo Saldhigga.

Qiimayntaas oo si la taaban karo u qeexaysa waxqabadka ayaa waxaa lagu sameeyay dhammann goo-bihii la booqday waxaana la kala siiyay darajooyinka A, B, C, iyo D.

## KORMEERKA XABSIGA MPCC

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida, Guddoomiyaha Maxkamadda Darejada Kowaad ee Ciidamada Qalabka Sida,iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir, ayaa kormeer ku tagay Xabsiga wayn ee Mogadishu Prison and Court Complex (MPCC). Kormeerkaan waxay ujeedadiisu ahayd qiimaynta xaaladda maxaabiista iyo guud ahaan Xabsiga. Gabagabadii kormeerka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo mas'uuliyiintii kale ayaa masuuliyiinta xabsiga ku bogaadiyey shaqada wanaagsan ee ay qaranka u hayaan iyagoo kula dardaarmay dardargelinta hawlaha shaqo ee ka socda xabsiga, ilaalinta xuquuqda maxaabiista iyo in sidoo kale in sare loo qaado feejignaanta madaama dalku u jihaystay dagaal ay iskaga xoraynaynayaan kooxda Khawaarijta





*Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida, Guddoomiyaha Maxkamadda Darejada Kowaad ee Ciidamada Qalabka Sida,iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir oo kormeeraya Xabsiga wayn ee Mogadishu (Prison and Court Complex (MPCC*

## KORMEERKA XABSIGA DHEXE EE MUQDISHO

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Wasiirka Caddaalada iyo Dastuurka, Wasiir ku xigeenka Caddaalada iyo Dastuurka, Kusimaha Taliyaha Ciidanka Asbuubta iyo saraakiil kale oo ka tirsan Wasaaradda Caddaalada ayaa kormeeray Xabsiga Dhexe ee Muqdisho. Kormeerkaasi wuxuu daarrnaa u kuur galidda xaaladda caafimaad, midda waxbarasho iyo xaaladda guud ee ay ku sugan yihiin maxaabiista ku xiran Xabsiga Dhexe. Waxay mas'uuliyiintu si dhow ugu kuur galeen hab-macaamilka maxaabiista xabsiga ku xiran, daryeelka loo fidiyo iyo adeegyada kala duwan. Kormeerka ayaa qayb ka ah dadaallada kor loogu qaadaayo ilaalinta xuquuqda iyo cadaalad helidda maxaabiista.





*Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Wasiirka Caddaalada iyo Dastuurka, Wasiir ku xigeenka Caddaalada iyo Dastuurka, Kusimaha Taliyaha Ciidanka Asbuubta oo kormeeraya Xabsiga Dhexe ee Muqdisho*

# TABABARADA BOOLISKA

Si loo tayeeyo korna loogu qaado xirfadda saraakiiska Booliska gaar ahaan kuwa baarista ayaa 2022 Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka mudadii u dhaxaysay 01-15/10/2022 tabaray qaar ka mid ah saraakiisha baarayaasha Ciidanka Nabadgelyada Waddooyinka.

Tababarkaan waxaa si wadajir ah u bixinayey Xeer ilaaliyayaal, Garsoorayaal ka socday Maxkamadda Gobolka Benaadir iyo saraakiil ka tirsan Ciidanka Nabadgelyada Waddooyinka. Tababarkan waxaa diiradda lagu saaray Mabaadi'ada Xeerka Ciqaabka Soomaaliyeed, Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerka Nabadgelyada Waddooyinka.

Munaasabada xiritaanka tababarka waxaa ka qayb galay saraakiil ka kala socotay Maxkamadaha, Xeer Ilaalinta, Taliska Booliska iyo macalimiintii tababarka. Gunaanadka xafladda tababarka ayaa tababartayaasha loo jeediyay dardaaran iyo dhiira galin, waxaana la gudoonsiiyay shahaadooyin. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa ka go'an inuu guto waajibkiisa kor-u-qaadida aqoonta iyo xirfada baarayaasha; waxaana u qorshaysan tababaro kale oo la siinayo danbibaarayaasha kala duwan ee Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed.



*Saraakiiska Booliska gaar ahaan kuwa baarista ooXafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka shahadooyin gudoonsiinayo*



*Xeer Ilaaliye ku xigeenka Farxan Ali oo shahaado gudooninaya qaar ka mid Saraakiisha Booliska gaar ahaan kuwa baarista*

# TAYAYNTA BAARIDDA FORANSIGGA

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo ka duulaya helista sugnaanta iyo ilaalinta caddaymaha dembiga ayaa Isbitaalka Madiina ku wareejiyey Qalab Caafimaad oo casri ah looguna tala galay Baarista dembiyada la xiriira Tacaddiga lidka ku ah Haweenka iyo Carruurta. Qalabkaan casriga ah ayaa badalaya kii horay loo isticmaali jiray oo keenay caqabado la xiriira xagga kaydinta iyo isku-milanka caddaymaha gaar ahaan DNA.

Qalabkaan waxa uu qeyb weyn ka qaadan doonaa helista iyo fududeynta caddeymaha dacwadaha gaar ahaan la xiriira tacaddiga jinsiga iyo ilmaha la isku qabsado. Si loo helo baaris hufan Xafiisku waxa uu qalabkaan horay ugu tababaray Waaxda Dembiyada Tacdiga Jinsiga ee Xafiiska Xeer Ilaalinta, hawlwadeennada Isbitaal Madina iyo CID. Qalabkaasi wuxuu awood u siinayaa hay'adaha caddaaladda ee isticmaalaya cadaymahaas in ay ogaadaan haddii wax laga bedelo ama la furo waqtiga loogu tala galay ka hor si loo helo baaris hufan.Talaabadan waa tii labaad ee uu Xafiisku ku casriyeynayo baarista Tacadiyada Jinsiga asaga oo horay u casriyeeyay Warqadda Dhaawac Muujinta (Refeertada).



*Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Qaranka oo Qalab Caafimaad oo casri ah looguna tala galay Baarista dembiyada la xiriira Tacaddiga lidka ku ah Haweenka ku wareejinaya Isbitaalka Madiina*




*Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Qaranka oo kulan la qaadanaya bahda Forensigga*

# HAWLGALINTA IYO WAXQABADKA WAAXYAHA XEER ILAALINTA

Waxaa qaab-dhismeedka Xafiiska XIGQ lagu sameeyay dib-u-habeyn ka turjumaysa hawlaha uu u xilsaaran yahay. Waxaa xoogga la saaray in la abuuro waaxo cusub iyadoo wax laga baranayo noocyada dacwadaha iyo muhimadda ay leedahay in xeer ilaaliyayaashu lahaadaan takhasus gooni ah.

Waxaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka horraantii bisha Juun uu magacaabay toban waaxood oo ka hawlgala Xafiiska. Inta aan Waaxahan la magacaabin waxaa marka hore loo dajiyay waajibaadka waax walba. Waajibaadka Waaxaha, marka laga reebo waajibaadka oogidda iyo dabagalka hawlaha ay u xilsaaran tahay waax walibaayi, waxay waaxaha oo dhan wadaagaan, inay waax walba:

- iskeed u baarto galalka la xiriira danbiyada ay u xilsaaran tahay;
- hagto hay'adaha baarista, ka hortagga iyo ka-daba-tagga danbiyada ee xiriirka la leh hawlaha ay u xilsaaran tahay.
- ka wacyigaliso bulshada saamaynta taban ee ay leeyihiin uu danbiyada ay u xilsaaran tahay iyo badqabka bulshada.
- tababarto hay'adaha kale ee dawladda ee la shaqeeya.
- cilmi-baaris ku samayso hawlaha ay u xilsaaran tahay, gaar ahaan: asbaababaha keena danbiyada, kororka iyo hoos-u-dhaca danbiyada, sharciyadooda iyo waxka-qabashadoodaba.
- tirakoobto galalka ay u xilsaaran tahay.
- yeelato qorshe-hawleed u gaar ah.

**Waaxyahaasi waxay kala yihiin:**

1. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Maaliyadda iyo kuwa danabaysan;
2. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Dawladda iyo Nabadgalyada Guud;
3. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Deegaanka, Duurjoogta iyo Kaymaha, Beeraha iyo Cudurada Faafa;
4. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Tahriibinta, Socdaalka, iyo Xeebaha;
5. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Maandooriyaha iyo Dawooyinka Khatarta ah;
6. Waaxda Tacaddiyada Jinsiga iyo Danbiyada ay galaan ama laga galo Caruurta;
7. Waaxda Danbiyada lidka ku ah Hantida;
8. Waaxda Oogidda Dacwadaha Madaniga ah;
9. Waaxda Rafcaanka; iyo
10. Waaxda Kormeerka Xabsiyada, Saldhigyada iyo Hagista Baarista Booliska.


Waxaa wax kasta si gaar ah ugu xilsaaran tahay inay iyadu billawdo ayna abuurto galal dacwadeedyo la xiriira hawlaha ay u xilsaaran tahay, halka ay sida caadiga ah Xafiisku dacwadaha ka sugi jiray in hay'adaha baaristu u soo gudbiyaan.

## WAXQABADKA

## WAAXAHA

1. Waaxwalba waxay diyaarsatay qorshe-hawleed u gooni ah waxayna yeeshaan kulama wakhtiyaysan si loo dardargaliyo hawlaha socda loona qiimeeyo wixii qabsoomay iyo waxa dhimman.
2. Waaxuhu waxay sameeyeen daraasad la xiriira shuruucda dalka iyo Heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya dhinac ka tahay ee khuseeya danbiyada ay u xilsaaran yihiin.
3. Waaxuhu waxay aqoonsadeen sidoo kalana abuureen xiriir wada shaqayneed ee waaxda iyo hay'adaha kale ee dawliga ama aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya arrimaha ay u xilsaan tahay.
4. Waaxaha qaar waxay si iskood ah u dabagaleen danbiyada lidka ah maslaxada qaranka iyagoo si iskood ah u furay galal dacawadeedyo iyadoo aan laga sugin Booliska. Waxaa jira galal furan oo baaristoodu meel wanaagsan ay marayso.
5. Waaxaha qaar waxay kormeero shaqo oo hawlahooda khuseeya ku tageen goobo laga yaabo inay xiriir la leeyihiin xadgudubyo la xirriira hawlaha ay u xilsaaran yihiin.

## QAAB DHISMEEDKA XXGQ



## WACYIGALINTA BULSHO EE WAAXUHU QABTEEN

Madaxa Waax kasta oo ka mid ah Waaxaha laga asaasay Xafiiska wuxuu fiidiyaw wacyigalin ah oo la dhigay baraha Bulshada ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ka sii daayay wacyigalin busho oo la xiriirta hawlaha ay qaabishan yihiin, saamaynta taban ee uu bulshada ku leeyahay danbiyada ay u xilsaaran yihiin, iyo goobta ay la soo xiriiri karaan haddii ay rabaan inay cabasho Xafiiska u soo gudbiyaan ama ay rabaan inay ku wargaliyaan fal-danbiyeed. Wacyigalintan ayaa si aan looga baran Xafiisyada dawladda gabi-ahaanba unkay oo maalgeliyay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxaana soo saaray Waaxda Warbaahinta ee Xafiiska. Waxaa ugu danbayn bulshada looga digay in tilaabo sharci waafaqsan laga qaadi karo cidda ku xadgudubta tacadiyada iyo fal-danbiyeedyada la xiriira hawlaha ay Waaxi u xilsaaran tahay.

## SOO GUDBINTA WARBIXINNADA WAAXAHA

Waax walba waxay kulamo wakhtiyaysan oo la xiriira waxqabadkeeda, caqabadaha iyo xalkoodaba la wadaagtaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Waaxaha qaar waxay soo ururriyeen soona gudbiyeen dhammaan shuruucda waddanka ama kuwa caalamiga ah ee hawlahooda khuseeya. Waxaa laga heli karaa nuqulada qoraaladaa Waaxda Cilmi-baarista ee XIGQ. Kaddib kulanadaa, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa haga Waaxaha sidoo kalana ku boorriya kuna dhiirigaliya dardargalinta hawlahooda.

Waxaa dhinac ka ah warbixinadaa in waax walba iyo Xeer Ilaaliye walba uu soo gudbiyo tirakoobka galalka uu galay (galeen) bil walba, saddexdii bilood walba ama sannadkiiba uu soo gudbiyo. Warbixinadaas waxay dhinac ka gaystaan fahamka isu dheelli-tirka dacwadaha, waxayna si la taaban karo u qiimaynaysaa waxqabadka iyo dadaalka waaxda ama xeer ilaaliyaha. Waxaa la diyaariyay saddex foom oo warbixinada loogu talagalay.

Dadaalka ay Waaxuhu ku bixiyeen gudashada waajibkooda shaqo ayaa qayb libaax ka qaatay kobaca tirada galalka la furay ee XIGQ iyo guud ahaan habsami u socodka hawlaha Xafiiska iyo adkaynta wadashaqaynta XIGQ iyo hay'adaha kale ee dawladeed ee ay wada shaqaynta leeyihiin.





# TABARRADA SHAQALAHA

Waxaa bishii Maarso dhammaadekeedi Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka tababar u xireen Xeer ilaaliyayaal sannadkii hore loo qaatay in ay ka mid noqdaan Xeer Ilaaliyayaasha. Xeer Ilaaliyayaashaa waxay tartan furan oo hufan ku soo galeen Garsoorka. Tababarkan oo socday Mudo 3 Bilood ah ayaa waxaa lagu qaadanaayay dhamaan xirfadaha shaqo ee uu u baahan yahay Xeer Ilaaliyaha sida :xilka iyo waajibaadka xeer ilaaliyaha, go'aaminta iyo diyaarinta eedda, shuruudaha iyo habka xarigga iyo fatashaadda, wareysiga, qoraalada sharciga, ka-qareemida dacwadda, ¡yo caddeymaha. Tababarkan waxaa hoggaaminayay XIGQ oo la kaashaday Machadka Tababarka Garsoorka, waxaana cashiradiisa bixinayay hawlwadeenno xul ah oo isigu jira muwaadiniin iyo ajaanib oo ka kala socday qaybaha kala duwan ee Garsoorka.






## TABABARRADA LA SIIYO ARDAYDA JAAMACADAHA DHIGTA

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka sida caadada u ah asagoo tixgelinaya baahinta aqoonta la xiriirta hawlaha hay'adaha garsoorka ayaa wuxuu sannad walba tababar ku-tababarid hawleed oo la xiriira garsoorka iyo mihnadda sharciga u fidiyaaa fursado ku-tababar hawlo ardayda dhigata kulliyadaha sharciga dalka ee iyo dibadda ee kala duwan, ama kuwa soo qalinjabiyay. Waxaa sannadkan 2022 ka fa'idaystay 39 tababarte oo isugu jira 13 rag ah iyo 26 dumar ah.

## MAXAABIISTA DIBADDA LAGA SOO CELIYAY

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka gaar ahaan qaybtiisa Xiriirada Dibadda ayaa xoogga saaray in muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku xiran dibadda gaar ahaan kuwa xukannadooda dhamaystay ama la cafiyay ee dib loogu soo celiyo dalka ayaa waxa ay dalka ku soo celisay muwaadiniin Soomaaliyeed oo laga kala keenay dalalka Japan, Isutagga Imaaraadka Carabta iyo Kuwayt. Muwaadiniintaa waxaa dalkooda si sharaf leh ugu soo dhaweeyay Garoonka Diyaaradaha ee Aadan Cabdulle mas'uuliyiin ka kala tirsan Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Taliska Booliska Soomaaliyeed. Muwaadiniinta qaar waxaa loo fududeeyay inay u safraan qaar ka mida ah gobolada dalka ee ehelkoodu ku nool yahay.



## ADKAYNTA XIRIIRKA BAHWADAAGTA SHAQO

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ayaa Xafiiskiisa ku qaabilay Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir Mudane Cabdikhadar Maxamed Xasan iyo Agaasimaha Ha'yadda Socdaalka iyo Jinsiyadda JFS Mudane Cabduqaadir Cilmi Cali.

Kulanka  ayaa ujeeddadiisu ahayd sidii loo horumarin lahaa xiriirka iyo wadashaqeynta saddexda hay'adood, gaar ahaan sidii loo maarayn lahaa loogana hortegi lahaa denbiyada ka dhanka ah socdaalka sharci daradda ah iyo daabulka dadka. Adkaynta xiriirku wuxuu door wax ku ool ah ka qaadatay xaqiijinta guulo ay sabab u tahay wada shaqaynta dhaw, is waydaarsiga xogaha iyo dhaqangalinta sharciga. Dhanka kale, waxaa la isla qaatay in in la sameeyo guddi farsamo oo ka soo talo bixiya sidii loo horumarin lahaa wada shaqaynta shaqada baaxadda leh ee hay'adaha ka dhaxaysa si waafaqsan sharciga.



*Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka OO Xafiiskiisa ku qaabilaya Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir Mudane Cabdikhadar Maxamed Xasan iyo Agaasimaha Ha'yadda Socdaalka iyo Jinsiyadda JFS Mudane Cabduqaadir Cilmi Cali.*

Waxaa sidoo kale Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ka qabsoomay kulan u dhexeeyay Xafiiska  iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalada Cimillada. Ujeedka kulanka ayaa ahaa sidii la isaga kaashan lahaa dembiyada ka dhan ka ah Deegaanka. Gebagabadii kulanka waxaa hoosta laga xarriiqay baahida loo qabo xoojinta wada shaqaynta iyo iskaashiga ay ka leeyihiin la dagaalanka dembiyada Lidka ku ah Degaanka.





*Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka OO Xafiiskiisa ku qaabilay  Wasiir Dowlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalada Cimillada.*

# KORMEER MIDAYSAN: GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE IYO XIGQ



*Gudoomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Gudoomiyaha Maxkamadda Gobalka Banaadir ayaa si wada jir ah u kormeeray howlaha kala duwan ee ka socda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Maxkamadda Rafcaanka Gobobala Banaadir iyo Maxkamadda Gobalka Banaadir.*

Ujeedada kormeerka waxay ahayd ilaalinta saacadaha shaqada, hufnaanta shaqada iyo guud ahaan dardar-gelinta howlaha shaqo ee Garsoorka Dalka.

Madaxda ayaa warbixinno ka dhageystay hawlwadeenada garsoorka, Waxayna kula dar-daarmeen baahida loo qabo hufidda adeegga bulshada si dhimrin iyo ixtiraamka ku dheehan yahay.

# KORMEERKA WAAXAHA KALA DUWAN EE XAFIISKA



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku ayaa kormeeray waaxaha kala duwan ee Xafiiska. Kormeerkaan waxa uu ugu kuurgalay habsami u socodka hawlaha maalin laha ah ee xafiiska. Waxa uu warbixinno ka dhagaystay xeer ilaaliyayaasha iyo hawlwadeennada Xafiiska gaar ahaan xog warran ku saabsan dacwadaha ka socda Xafiiska iyo halka ay marayaan. Sidoo kale, Xeer Ilaaliyuhu waxa uu Xafiiska kula kulmay shacab adeegga caddalada usoo doontay Xafiiska, asagoo u kuurgalay sida shacabku ugu qanacsan yihiin adeegga loo fidinaayo.Waxa uuna kula dardaarmay Xeer ilaaliyayaasha iyo hawl-wadeennada Xafiiska in bulshada loogu adeego si hufan oo caddaalad, ixtiraam, soodhoweyn iyo qancin Ku dheehan tahay.

## GUNAANAD

**Guulaha wax-ku-oolka ah sannadkan ee Xafiisku gaaray waxay ku yimaaddeen dadaalka hawlwadeenada xafiiska, wadashaqaynta hay'adaha garsoorka, hirgalinta sharciga iyo wax-ka-baddalka nidaamka shaqo. Haddana waxaa lagama maarmaan inaan sii labanlaabno hawlaha aan billawnay.**

**Dhinaca kale waxaan qorshaynaynaa sannadkan 2023 inaan sii dardargalino hawlaha socda, aanana fulinno qorshayaashan.**




- Waxaan sii joogtaynaynaa tayaynta iyo waxqabadka waaxaha iyadoo ay waax walba si iskeed ah u furayso galal dacawadeedyo iyadoo aan laga sugin Booliska.
- Waxaan xoojin doonaa kormeerka iyo hagista booliska oo yididiilo wanaagsan ay ka muuqato.
- Waxaan xoogga saaraynaa baaridda iyo dacwadeynta danbiyada lidka ah maslaxada qaranka iyo kuwa abaabulan oo ay ku jiraan kuwa la xiriira lacag-dhaqista iyo maalgelinta argagixisada.
- Waxaa la gaarsiin doonaa adeegga cadaaladda iyo kan xeer ilaalinta goobaha laga xoreeyay khawaarijta.
- Waxaa la xoojin doonaa adkeynta isku xirnaanta, wada shaqaynta iyo iswaydaarsiga aqooneed ee ka dhaxeeya XIGQ iyo Xafiisyada Xeer Ilaalineed ee DXF.
- Waxaa dib loo qiimayn doonaa istiraatijadda qorshaha sannadaha soo socda. Waxaa la hubsan doonaa in qorshuhu ka turjumo higsiga lana jaanqaado himilooyinka lagu taamayo.
- Waxaa la casriyayn doonaa nidaamka maamulka galalka oo lagama maarmaan u ah helidda cadaalad hufan, la heli karo oo dhexdhexaad ah.
- Waxaa iyana xoogaa la saari doonaa in la sii hormariyo nidaamka baaridda cilmiga sayniska ku salaysan. Waxaana dhisi doonaa Machadka Forensigga Qaranka.
- Waxaan adkayn doonaa xiriirka iyo wadashaqaynta naga dhaxaysa xafiisyada xeer ilaalinta iyo dacwad-oogidda ee heer gobol, qaarad iyo caalami. Waxaan dib-uga-mid noqon doonaa Ururada Xeer Ilaalinta Carabta, Bariga Afrika, Afrika iyo Adduunakaba.
- Waxaan sii xoojin doonaa tababarrada gudaha, dibadda iyo sugidda halbeegyada hawl-qabadka.

XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA

مكتب النائب العام

SOMALIA

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL